

# Saamerka

Waxaa jira inta u dhaxeysa 60000 ilaa 70000 oo Saamer ah. Iswiidhan waxaa deggan ku dhowaad 17 000 oo Saamer ah, Finland waxaa deggan ku dhowaad ahaan 7500 saamer Ruushkana ilaa 2000 ayaa deggan. Norway waxaa deggan ku dhowaad 40000 oo saamer ah. Intooda ugu badani waxa ay deggan yihiin dhinaca waqooyiga buurta Salt ama magaalooyinka waaweyn, sida tusaale ahaan Oslo.

## Saamerku waa dadka asalka ah

Saamerku waa dadka asalka ah. Taas macnaheedu waa in Saamerka ay muddo aad u fog ay ku noolaayeen qeybaha waqooyi ee Norway, Iswiidhan iyo Ruushka. Iyaggu halkaas ayey ku noolaayeen ka hor intii aan la xaddidin xuduudaha u dhaxeeya wadamadaas.

Dadka asalka ah badanaa waxa ay leeyihiin dhaqankooda u gaarka ah, kaas oo ka duwan inta kale ee deggan waddanka ay ku noolyihiin. Waxaa adduunka ka jira dad farabadan oo asal ah. Tusaale ahaan Kurdidu waa dadka asalka ah wadamada Iiraan, Ciraaq, Suuriya iyo Turkiga.

## Tartanka wadida deerada

Tartanka wadida deerada waa ciyaar caan u ah Saamerka haysta deerooyinka. Tartammada qaarkood wuxuu ciyaaryahanku lugta ku haystaa Shii(Ski) oo waxa kale uu xarig gadaal uga xiraa deerada. Tartammada kale waxaa uu

cayaaryahanku ku fariistaa alwaax lagu fariisto oo gadaal uga xiran deerada.

Deerooyinka ugu dheereeya waxa ay ku ordi karaan 60 km/saacadii.

Waxaa la qabanqaabiyaa tartanka wadida deerada ee horyaalnimada Norway iyo kan horyaalnimada wadamada waqooyiga Yurub



Tartanka wadida deerada. Sawir qaade: V. Belov, Shutterstock

## Maalinta qaranka Saamerka

Maalinta qaranka Saamerku waa 6-da febraayo. Maalinta qaranku waxay ka dhaxeysaa Saamerka deggan Norway, Iswiidhan, Finland iyo Ruushka. Maalintan waxaa loogu dabaaldegaa si loo xuso shirkii koowaad ee guud oo ay Saamerka 6-dii Febraayo 1917 ku yeesheen magaaladda Trondheim. Xilligaas waxaa markii ugu horeysay oo ay kulmaan Saamer ka yimid Norway iyo Iswiidhan si ay uga wadashaqeeyaan danaha Saamerku ay wadaagaan.



*Marwo Saamer ah oo is qurxisay oo wada mootada barafka. Waxa laga yaabaa in ay u dabaaldegayso maalinta qaranka? Sawir qaade: V.Belov, Shutterstock*

Maalinta qaranka Saamerka waa maalin calan oo rasmi ka ah gudaha Norway, maalintan waxaa lagu dabaaldegaa oo lagu xusaa calamada Norway iyo Saamerka. Maalintan meelo badan oo gudaha Norway ah ayaa looga dabaaldegaa. Gudaha Tromsø todobaad dhan ayaa laga dabaaldagaa iyada oo la samaynayo xafallo kala duwan tusaale ahaan ruwaayaddo iyo tartanka deerada. Heesta qaranka ee Saamerku waa Sámi soga lávlla, taas oo macnaheedu yahay heesta dadka Saamerka. Maalinta qaranka Saamerka waxaan dhahnaa «Lihku beivviin!» oo macnaheedu tahay «Hambalyo maalintan!»

## Calanka Saamerka

Calank saamerku waxa uu ka dhexeeyaa Saamerka deggan Noorway, Iswiidhan, Finland iyo Ruushka..



*Callanka saamerka.Sawirka: The hornbill Studio, Shutterstock*

Fikirka calanka waxaa looga soo qiyaas qaatay gabay dhaqameedka saamerka kaas oo ka dhiga in ay yihiin wiilashii iyo gabdhihii qorraxda. Goobada ku dhexaal calanka waxa ay calaamad u tahay qoraxda iyo dayaxa.

Golaha shacabka Saamerka ayaa go'aamiya isticmaalka calanka. 6-da febraayo waxaan dhahnaa «Lihku beivviin!» oo macnaheedu tahay «Hambalyo maalintan!»

## Luuqadda Saamerka

Luuqadda Samarku ma ahan hal luuqad, laakiin waa koox luqadeed ka kooban 11 (kow iyo toban) luqadood oo kala duwan. Luuqadda saamerka waxa ay qaraabo la tahay luuqadaha finnishka, Estoniyanka iyo Hangariyaanka.

Luuqadda Saamerka waqooyi ayaa ah koox luqadeedka ugu weyn saamerka. Saamerka deggan Noorway, Iswiidhan iyo Finland waxa ay isticmaalaan luuqadda saamerka waqooyi. Luuqadda saamerka koonfureed ma ahan luuqad si maalinle ah qoysas farabadani ugu hadlaan. Waxaa xoogaa ka fiican luuqada lulesamisk, sababtoo ah waxaa jira caruur

Samene – somali

farabadan oo lulesamik lagu baro guriga iyo dugsigga.

Bures (Waxaa loogu dhawaaqaa Bores) macnaheedu waxa ay afka saamiga waqooyi ku tahay "iska waran".

Lavvo iyo pulk waa erayo saamisk ah oo aan norwiiji ahaan u isticmaalno.



Lavvo(teendho). Foto: V. Belov, Shutterstock



Skaller

Kabo Saamer